

Qoysaska iyo Child Outcome Summary (Sookoobista Natiijada Ilmaha)



SIDAY U SHAQAYSAA?

Nidaamka sookoobista natiijada ilmaha

Nidaamka Child Outcome Summary (Sookoobista Natiijada Ilmaha, COS) waxay uruurisaa xogta hormarka caruurta si loo sameeyo taageerada hore. Macluumaadka guudmarka ah ee ku saabsan sadexda natiijo ayaa la uruurin doonaa wakhtiga ilmahaagu geleyo oo uu ka baxayo adeegyada taageerada ee hore.



WAA MAXAY SADDEXDAA NATIJO EE MUHIIMKA AHI?

La socodka natiijada

- Xirfadaha wanaagsan ee dareenka bulshada iyo xidhiidhada bulshada
- Helitaanka iyo isticmaalista aqoonta iyo xirfado
- Isticmaalka dabeecadaha ku habboon si ay u daboolaan baahida.



YAA GO'AAMINAYA HORUMARKA?

Qiimaha waalidka iyo daryeelayaasha

Adeegyada taageerada hore ee lagu aqoonsado waalidka iyo daryeelayaasha kale waxaa weeye macalimiinta kowaad ee caruurta yaryar. Waalidka waxaa marwalba lagu dhiiri geliyaa inay ku lug yeeshaan. Waalidku wuxuu u yaqaanaa ilmahiisa sida ugu wanaagsan. Waxa aanu u baahanahay xogtooda.



SIDEE XOGTA KOOBAN LOO ISTICMAALAA?

Cabirka tayada adeegyada taageerada hore

Macluumaadka kooban waxa uu u sheegaa barnaamijkaaga deegaanka iyo kooxda Early Support for Infants and Toddlers (Taageerada Hore ee Caruurta Sabiga iyo Socod Baradka ah, ESIT) ee gobolka sida adeegyada taageerada hore ay u keento isbedel wayn oo ilmaha sabiga ah, socod baradka, iyo qoysaska; taageerada ESIT ee adeegyada hormarinta; oo waxa uu bixiyaa xogta Annual Performance Report (Warbixinta Waxqabadka Sanadkii, APR). APR waxaa heleya shacabka.



MIYAA ILMAHAAGA XOGTIISA LA ILAALIYAY?

Sirta xogta ayaa mudnaanta kowaad ah

Haa, macluumaadka ilmahaaga waa la ilaaliyay. Kaliya xogta oo lasoo koobay ayaa laga warbixin doonaa. Magacaaga iyo magaca ilmahaaga laguma dari doono xogta lasoo koobay ee laga warbixinayo. Waxa aanu u adeeganayaa xogahan si wanaagsan ee ay u shaqeyaan adeegyada taageerada hore.

